



Nabiga scw wax buu sheegay, markaasuu yiri: kaasi waa marka cilmigu sii tagayo

Siyaad Binu Labiid Allaha ka rali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabiga scw wax buu sheegay, markaasuu yiri: kaasi waa marka cilmigu sii tagayo, waxaan iri: Rasuulka Ilaahayow, sidee buu cilmigu u tagayaa, anagoo akhriyeyna Qur'aanka ubadkayagana aan barayno, ubadkayaguna ubadkooda sii barayaan ilaa qiyaamaha?, wuxuu yiri-Rasuulku-:(hooyadaa ku wayday siyaad, waxaan kuu malaynaayey ninka ugu fiqiga badan Madiina, kuwani miyaanay ahayn Yahuud iyo Nasaaro oo Tawraat iyo Injiil akhriyaya, hadana aanay ku camal falayn waxa ku qoran.

[Xadiis Saxiix ah, marka la eego kuwa lamida] [Waxaa wariyay Ibnu Maajah]

Nabigu scw wuxuu dhex fadhiyey asxaabtiisa, wuxuuna yiri waqtigaasi waa waqtiga dadka laga siibayo cilmiga, Siyaad Binu Labiid Alansaari Allaha ka raali ahaade wuu la yaabay Nabiga scw wuuna waydiiyey, Wuxuuna yiri: sidee baa cilmiga loo waayin oo nooga lumin?! anagoo akhrinayna oo xifdinay, walaahi waanu akhriyeynaa, waana baraynaa haweenkayaga iyo caruurtayada, iyo caruurta caruurtayada, Nabiga scw wuxuu yiri: isago la yaaban Siyaad hooyadaa ku wayday waxaan kuu haystay inaad ku jirto culimada reer Madiina! Ka dib Nabigu scw wuxuu u cadeeyey Siyaad in cilmiga waayidiisu uusan ahayn Qur'aanka oo la waayo, laakiin ay tahay ku camal falkiisa oo la waayo, Waa kuwaas Tawraat iyo Injiil oo ay haystaan Yahuud iyo Nasaaro, hadana wax kuma tarin kamana ay faa'iidaysan ujeedadii labadaa kitaab laga lahaa,! kaasoo ahaa inay ku camal falaan waxay ka barten.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65045>

